Caddad Gaar ah oo ku wajahan Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda



# Carruurteenna “our children”

Warsidaha UNICEF Soomaaliya Maarso 2009

## Iskaashi dhow ayaa muhiim u ah helidda biyaha ee Soomaaliya

***Waxaa qorey Christian Balslev-Olesen Wakiilka UNICEF Somalia***

UNICEF ayaa barnaamijkeeda 2008 ilaa 2010 ku dadaaleysa sidii ay u abuuri lahayd xiriir dhow iyo agaasin dhex mara hay’adaha ugu muhiimsan ee ka shaqeeya waaxda Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda si loo hubiyo in kuwa aan adeegyadaan ku haysanin Soomaaliya ay u helaan. Si loo gaaro yoolalkaas, UNICEF waxa ay si dhow ula shaqeyneysaa ururada caalamiga ah iyo kuwa degaanka, bulshooyinka, maamullada iyo guddiyada biyaha, kooxaha iskaa wax u qabso ku shaqeeya ee degaanka, ganacsiyada, ururada ku dhisan bulshada iyo NGO-yo.

Iyada oo ay jirto in 71% dadka Soomaalida ahi aaney haysan biyo nadiif ah oo la cabbo oo 63% aaney haysanin adeegyada fayadhowrka iyo kuwa asturidda qashin-saarka, ayaa UNICEF barnaamijkeeda 2008 ilaa 2010 ku dooneysa in ay ku wanaajiso kartida ay hay’adaha iyo bulshooyinka bixinaya adeegyadan ku gaarsiin karaan dadka aan haysanin, dugsiyada iyo xarumaha hooyada iyo dhallaanka (MCH).

Sameynta iskaashi dhex mara maamullada iyo ganacsiyada ayaa la sii dhiirigelinayaa si loo wanaajiyo kartida maamulidda mashruucyada biyaha iyo fayadhowrka ee magaalooyinka iyo miyigaba.



***Gabdho Soomaali ah oo gacmahooda dhaqaya. Biyaha ayaa lagamamaarmaan u ah nadaafadda. Credit© UNICEF Somalia/2008***

Bulshooyinka ayaa sidoo kale laga qaybgelinayaa sameynta iyo fulinta mashaariicda iyo sidoo kale ka shaqeysiintooda iyo dayactirkooda. Iyada oo ka mid ah dadaallo lagu dhisayo kartida ayaa UNICEF waxa ay higsaneysaa in ay sameeyso nidaamyo lagula socdo tayada biyaha, lagu helo xogta iyo wararka laguna sahaminayo hay’adaha iyo maamullada. Dadaalka waxaa lagu wajihi doonaa hubinta in ay sii shaqeeyaan nidaamyada biyo-siinta ee hadda jira, dayactiridda kuwa kharibmey iyo taageeridda iyo ballaarinta kuwo cusub. Dadaallada lagu wanaajinayo beddelidda hab-dhaqanka dadka ayaa diiiradda saari doonna Dugsiyada, xarumaha hooyada iyo dhallaanka iyo goobaha Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda. Waxaa la taageeri doonnaa sidii loo badin lahaa qoysaska haysta musqulo loona ballaarin lahaa kuwa helaya fayadhowr. Dadaal xooggan ayaa lagu bixin doonnaa hubinta in waxqabayada Biyaha, Fayadowrka iyo Nadaafadda si dhow loola xiriiriyo kuwa Nafaqeynta, Caafimaadka iyo Waxbarashada iyada oo loo marayo hindisayaasha horumarka ee ay bulshadu waddo iyo Ololayaasha Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Arrintan dambe, UNICEF iyo WHO ayaa la hawlgelaya Soomaalida si carruurta shan jirka ka yar looga ilaaliyo cudurada laga hortegi karo, loo yareeyo nafaqo-xumada iyo in laga dhowro haweenka cudurka kojiyaha (teetanada) marka ay umulayso.

UNICEF waxa ay sii wadi doontaa in ay dadka gudaha ku barokacay siiso biyo ammaan ah iyo habab fayadhowr oo loo asturo qashin-saarka mar kasta oo ay suurtagal tahay. Taageerada ayaa ku wajahnaan doonta in ay sii shaqeeyaan nidaamyada hadda jira iyo in la dayactiro kuwa xumaaday si natiijooyin degdeg ah loo gaaro.

Hawlaha ayaa sidoo kale wax ka qaban doona arrimaha fayadhowrka degaanka iyo kuwa nadaafadda shakhsiga. Sahayda nafaha lagu badbaadinayo ayaa la sii dhigo doonaa goobo istiraatiiji ah in si taabogal ah wax looga qabto marka si kedis ah ay dadku meel ugu guuraan ama marka ay dillaacaan cudurada shubanbiyoodka.

## Bixinta adeegyada biyaha waxa ay wax tarayaan carruurta, haweenka iyo guud ahaan bulshada

Toddobadii sano ee la soo dhaafey, Safiya iyo ninkeeda, Diiriye waxa ay ku noolaayeen xerada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Jaamalaaye, ee ku taalla geesta Bari ee magaalada Berbera ee Waqooyiga Galbeed ee Soomaaliya (‘Somaliland’). Sida dad kale oo badan, waxa ay degeen halkaas markii ay abaartu ka laysay xoolahoodii ay ku haysteen miyiga gobolka Saaxil.

Xerada waxa ay ku taallaa dhul qorfa ah oo bus badan oo qashinqub u ahaan jirtey magaalada, ka hor intii dowladda hoose oo kaashaneysa urur caalami ah aysan u nadiifin Dadka Gudaha ku Barokacay si ay u degaan. Safiya, ninkeeda iyo afar carruur ah ayaa hadda ku nool guri laba cooshadood ka kooban oo ku yaalla dhul yar oo lagu soo owday tiirar geedo ah oo dhexdooda lagu beerey geedo tiin ah iyo jiingado gaboobey.

Ninkeeda waxa uu ka xamaashaa dekadda Berbera, halka iyadu ay ka shaqeyso meel xoolaha lagu qalo oo halkaa u dhow. Celceliska dakhliga soo gala labadoodu waa wax ka yar $200 doolar bishiiba, laakiin marka la bardhigo kuwo badan oo ka mid ah 500 ee qoys ee xeradaa ku nool, iyaga ayaa ah kuwo la ixtiraamo oo la aaminsan yahay in ay ka mid yihiin qoysaska ugu hodonsan bulshadaas. Waxa ay kaga duwan yihiin kuwa deriskooda ah ee ka soo qaxay koonfurta Soomaaliya waa iyaga oo mararka qaar gacan ka hela qaraabadooda oo weli ku nool degaannada miyiga. Safiya iyo qoyskeedu waxa ay u adkeysanayeen xaalad nololeed oo aad u xun toddobadii sano ee ay ku noolaayeen xerada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Jaamalaaye.

Eeg bogga 2aad

**CADDADKAN WAXAA KU JIRA**

**Faaladda Wakiilka ……………………………………………….. 1**
**Adeegyada biyaha oo wax tarey bulsho weyn ………………… 1/2**
**Dhiirigelinta beddelka habdhaqanka ee Boosaaso …………... 2**
**Min biyo-dhaamin ilaa biyo joogto ah oo lagu heley Afgooye... 3**
**Maamul ku dhisan iskaashiga dowladda-ganacsiga.... 4**
**Guulihii ay UNICEF gaartey 2008da……………………...5**
**Nagala Soo xiriir………………………………………….. 5**

**Adeegga, habdhaqanka & gargaarka ayaa muhiim u ah WASH...**

## Beddelidda habdhaqanka — dhiirigelinta nadaafadda iyo fayadhowrka Boosaaso

Laba biyo-iibiye, Faadumo iyo Haweeyo, oo ku kala nool xerooyinka Dadka Gudaha ku Barokacay ee Inji iyo Shabeelle ee magaalada Boosaaso ayaa go'aansaday in aaney biyo ka iibin qof kasta oo weelkiisa biyuhu ama jirikaankiisu aanu nadiif ahayn. Intaa waxaa dheer, in koox haween dhalinyaro ah oo ku nool xerooyinkaa ay ku heshiiyeen in aan haweeneyna loo oggolaan in ay biyo ka dhaafsato isha biyaha iyada oo isticmaaleysa jerikaan aan nadiif ahayn.



***Qoys ku nool xerada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Buulo Deto, Boosaaso Waqooyiga Bari ee Soomaaliya, ('Puntland') taas oo ay ku nool yihin 1,300 oo qoys. Credit© UNICEF Somalia/2009/ZaidJurji.***

Ammaradan iyo xeerarkan ayaa u muuqda kuwa adag, laakiin waxa ay taageero ballaaran ka heleen xubnaha dhalinta-yar ee bulshada waxaana ay keeneen in ku dhowaad dhammaan haweenka ku nool xerada ay ku dhaarteen in ay hubiyaan in jerikaannadoodu ay ahaadaan kuwo aad nadiif u ah. Arrintaa ayaa u keentey in ay biyo ka qaataan ilaha biyaha ee u dhow. Tallaabo kale oo taa dheer waxa ay ahayd in qaar ka mid ah isla haweenkaan iyo xubnaha bulshada ay si iskaa wax u qabso ah u oggolaadeen in ay xerada ka qaadaan qashinka iyaga oo taageero ka helaya hay'adaha bani'aadamnimada.

Wacyiga dadka ee hababka lagu hubinayo in biyaha la cabbo ay nadiif yihiin ayaa sii kordhaya. Safiya, oo ah haweeney deggan xerada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Shilkow ayaa sheegtey in isticmaalka kiniiniga biyaha lagu nadiifiyo (*aquatabs)* uu muhiim yahay uuna lagama maarmaan u yahay qoys kasta oo xerada ku nool. Waxa ay tiri "Isticmaalka *aquatab* waxaa uu muhiim u yahay sida cunidda cunto wanaagsan ay muhiim u tahay – intiiba aan isticmaaleyno *aquatab*, Dadka Gudaha Ku Kabarokacay waxa ay ahaanayaan kuwo caafimaad qaba".

Haweenkaan ayaa dhiirigelinaya waxbarashada nadaafadda taana waxa ay timid markii ay ka qaybgaleen tababarka Wax ka beddelka Nadaafadda iyo Fayadhowrka waxaana ay hubinayaan in fariimaha beddelidda habdhaqanka ay gaaraan bulshadooda. Tababarkan waxaa bixiyey NGO degaanka ka shaqeeya, SORSO, oo taageero ka heley UNICEF. Dadaalka dheeriga ah ee lagu bixinayo wanaajinta nadaafadda ayaa tilmaameysa in dadaalka hal-abuurku ku dheehan yahay ee wargaarsiinta uu guul keentey.

Adeegsiga gabayo ayaa ah mid ka mid ah hababka ay SORSO ay farriimaha nadaafadda dadka ku gaarsiineyso ayna ku abaabuleyso iskaa wax u qabsadayaal nadiifiya xerooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay. Mid ka mid ah gabayadaas ayaa leh – "*Waagii iftiimey Subax Axadeed, dharaar cad markii ay timid taageerada SORSO iyo UNICEF, aqoonta ballaaran ee farriimaha fayadhworka ee ay bixiyaan, Alle waa ku farxaa dhammaan arrimahaan. SORSO iyo UNICEF waa ay naga toosiyeen markii degaankeenu uu qashin iyo saxaro buuxisey, (waa ay naga kiciyeen) meel aaney jirin musqulo si hagaagsan loo isticmaalo, (waa ay naga kiciyeen) meel aaney jirin aqoon; la isuma imaan: lagumana dadaalin; la isma tusin sida loo farodhaqdo; UNICEF iyo SORSO waa ay na kiciyeen markii aan jirran lahayn. Subxaannalaah".*

Dadka Gudaha Ku Barokacay ayaa hadda tirinaya gabayo ay ku xoojinayaan wixii ay barteen. Qaangaarka xerooyinka ku nool ayaa sidoo kale aqoontii ay barteen u gudbinaya carruurtooda. Carruurta ayaa la barayaa in aaney nuugin farahooda wasakheysan hooyooyinkana waxaa lagula talinayaa in ay hubiyaan in si habboon ay u asturaan saxarada carruurta si loo fogaado in ay wasakheyso degaanka.

Sahra, oo ah islaan waayeel ah oo ku nool xerada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee 100ka Buush ee Boosaaso, ayaa meel fagaare ah ka qiratey in ka hor intii aaney ka qaybgelin tababarka barnaamijka wax ka beddelka nadaafadda iyo fayadhowrka, aaney muhiiimad siineynin si habboon u asturidda saxarada carruurta. Waxa ay tiri hore uma ay dabooli jirin cuntada, dikhsiguna meel walba oo gurigeeda ka mid ah waa uu joogey. Heseyeeshee, arrimuhu hadda waa ay is beddeleen tan iyo intii ay bilowday in ay ka qaybgasho tababarka. Hadda waxa ay nadiifisaa daaraddeeda waxaana aad u yaraadey tiradii dikhsiga. Waxa ay u mahadcelisey SORSO iyo UNICEF.

## Adeegga biyaha oo wax tarey bulsho dhan

*Ka yimid bogga 1*

Ka hor intii aaney UNICEF degaanka ka sameynin meel biyaha laga dhaansado, halka ugu dhow ee biyo laga heli karey waxa ay ka fogeyd laba kiilomitir. Dadka xerada deggan ma ay haysan musqulo, mana heleynin adeegyada rug caafimaad iyo xarunta hooyada iyo dhallaanka. Bulshada inteeda kale, halkaas oo in ka badan boqolkiiba 50 aaney haysan dakhli rasmi ah, ayaa noloshu ay aad ugu sii xumayd.

Sida hooyooyin kale oo karti leh kuna nool xerada, Safiya sheeko ayaa ay inoo haysaa. "Ma aanan haysan carruur kortey oo iga caawisa biyo aroorka. Maalin kasta laba jeer ayaa aan biyo u dooni jirey meel fog – mar subaxii ah iyo mar galabtii ah si biyo dhabarkeyga aan ku soo qaado aan uga arooro ceelka biyaha ee iigu dhow ee magaalada ku yaalla. Illaa iyo hadda dhabarku wuu I xannuunaa biyo aroorkaa daraaddii".

Ilaa wakhti dhow, 600 ee qoys ee ku nool xerada waxa ay labo ilaa saddex jerikaan oo biyo ah ka soo xambaari jireen meel laba kiilo mitir u jirta, ama waxa ay halkii barmiil oo 200 litir oo biyo ah ay lacag 12,000 Shillin Somaliland ah kaga iibsan jireen booyadaha (lacagtaas oo u dhigan $1.80).

"Sanad kasta xilliga kulul ee jiilaalka, carruurta waxaa ku dhici jirey shuban waxaana aan ku khasbanaan jirey in aan geeyo Xarunta Hooyada iyo Dhallaanka ee iigu dhow ama cusbitaalka weyn ee magaalada. Inta badan waxaan guriga ku soo noqon jirey anniga oo aad u daallan oo aan biyana haysan," ayaa ay tiri Safiya. "Waxa aan booqan jirey saaxiibo iyo qaraabo aan ku lahaa meelo kale oo magaalada Berbera ka mid ah halkaas oo lahayd meelo u dhow oo tuubooyinka ay biyo ka socdeen waana aan ku xanaaqi jirey wakaaladda biyaha iyo dowladda hoose oo na dejisey meel aan biyo lahayn. Haseyeeshee, halkeygii ayaan iska degannaa anniga oo rajeynaya in maalin uun degaankeena uu heli doonno adeegyadaas".

Ugu dambeyntii Safiya iyo dadka kale ee deggan xerada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Jaamalaaye waxa u rumowday riyadoodii markii UNICEF ay Berbera ka fulisey mashruuc uu Midowga Yurub maalgeliyey oo ku saabsanaa biyo-gelinta magaalooyinka kaas oo keeney in la dayactiro nidaamka biyaha iyo in loo sameeyo nidaam habboon oo loo maareeyo.

UNICEF waxa ay la shaqeysey Wasaaradda Kheyraadka Biyaha iyo Macdanta ee Soomaaliland, Dowladda Hoose ee Berbera, Wakaaladda Biyaha ee Berbera, CCG (NGO degaanka ah) iyo hoggaamiyeyaasha bulshada ee magaalada Berbera. Biyo ammaan ah oo la cabbo ayaa hadda ay helaan dad intii hore ka badan oo reer Berbera ah ka dib markii la dayactirey isha biyaha ee Dubar iyo nidaamka qasabadaha biyaha ee Jaamalaaye.

Qaybta kobcinta hay'adda ayaa loo qoondeeyey in la dhammeystiro bisha Juunyo 2009ka waxaana lagu doonayaa in lagu taageero maareynta nidaamka iyada oo loo marayo hab iskaashi dhex mara dowladda iyo ganacsatada. Mashruuca ka sokow, UNICEF waxa ay taageertey dhismaha xarun caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ah (MCH) iyo dugsi u dhow xerada Dadka Gudaha ku Barokacay taas oo qayb ka ah habka hawlgalka ee dhiirigelinaya iskuxiridda adeegyada bulshada.

**Eeg bogga 3aad**

**200,000 oo ka faa'iideysanaya biyaha Boosaaso, Bacaad-Weyn, Marka iyo Baydhabo...**

# Biyo dhaaminta oo lagu beddeley nidaamyo joogto ah oo biyo-gelin

Dhammaadkii bishii Oktoobar 2007 dagaal cusub ayaa ka qarxay Muqdisho, kaas oo uga sii darey hubaal-la'aantii siyaasadeed iyo nabadgelyo-xumadii haysatey dad badan oo magaalada deganaa kaas oo ku khasbey in ay ka qaxaan magaalada iyo agagaarkeeda iyaga oo u qaxay meelo ammaan dhaanta. Waxaa la qiyaasayaa in tiro aan hore loo arag oo dad ah – in ka badan 500,000- guryahooda iyo ganacsigooda kaga qaxeen muddo aad u yar gudaheeda.



*Haween saf ugu jira biyo uu bixinayo urur la-hawlgale ku ah Soomaaliya. In kasta oo biyo-dhaamintu ay faa'iido leedahay marka xaaladaha degdegga ah lagu jira, haddana siyaasadda UNICEF waxa ay xoogga saareysaa sameynta nidaamyo waara oo biyo lagu helo. Credit© SDRO/2008*




*Haween, carruur iyo rag biyo ka dhaansanaya tuubooyin dhowaan laga dhisey xerada Lafoole ee waddada Afgooye, Credit© UNICEF Somalia/2009*

Qaybtii ugu badneyd dadka soo qaxay waxa ay ku urureen waddada u dhaxaysa Muqdisho iyo Afgooye, ee waqooyiga Muqdisho iyo degmada Dayniile, iyaga oo ku biirey 100,000 ee qof, ee hore degaannadaa fog ugu noolaa. Dadkaan ku barokacay ee ku ururey goobtaa ayaa keeney culays bani'aadamnimo – iyada oo mid ka mid ah arrimihii muhiimka ahaa ay ahayd in si degdeg ah biyo nadiif ah oo la cabbo iyo adeeg fayadhowr oo ku filan loogu heli lahaa dadkaas.

UNICEF iyo la hawlgalayaasheeda dhinaca biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda ayaa isla markiiba wax ka qabtey iyada oo muhiimad la siiyey in si degdeg ah biyo loo siiyo kuwa ugu nugul – gaar ahaan carruurta iyo haweenka. Habka ugu degdegsan ee lagu hubin karey bixinta biyo ammaan ah waxa ay ahayd in biyo loo dhaamiyo.

In kasta oo ay taabogal tahay, haddana biyo-dhaamintaa ayaa ahayd istiraatiijiyad qaali ah, iyada oo markaa dhibaatooyinku soconayeen wakhti ka badan muddadii la rajeynayey in ay ku dhammaadaan, ayaa waxaa dhammaanayey kheyraadka ay la-hawlgalayaashu ku wadi kareen waxqabadyada ayna wax kaga qabanayeen baahida sii kordheysey.

UNICEF, oo gacan ka heleysey deeq-bixiyeyaasheeda ugu muhiimsan, ayaa ku khasbanaatey in ay qaaddo mas'uuliyad sii kordheysey oo ay ku maalgelineysey dadaallada biyo dhaaminta ee la-hawlgalayaasha Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda (WASH), oo mararka qaarkoodna waqtiga la haystey uu aad u yaraa si looga fogaado in ay kala go'do bixinta biyo ammaan ah oo la siiyo haweenka iyo carruurta. Bishii Agoosto 2008 ayaa UNICEF waxa ay maalgelineysay 2.3 milyan oo litir oo biyo ah maalin kasta loo soo dhaaminayey ku dhowaad 250,000 oo qof.

In kasta oo waxqabadyada biyo bixinta ee UNICEF caadi ahaan lagu doonayo in la gaarsiiyo jaangooyooyinka ugu hooseeya ee wax ka qabashada masiibooyinka oo ah 7.5 ilaa 15 litir oo biyo ah/qofkii/maalintii, iyada oo lagu xisaabtamayo tirada dadka soo qaxay, iyo sida ay ugu ururson yihiin xerooyin kooban iyo qiimaha sarreeya ee biyo-dhaaminta, ayaa biyaha la bixinayey waxa loo qiimeeyey si xaqiiqda ku dhisan waxaana ay u dhaxaysey 7 ilaa 10 litir maalintii.

Biyo dhaaminta ayaa ahayd fursadda keliya ee lagu bixin karey biyo la cabbo oo ammaan ah oo dad ku filan si loo wajaho xaaladda degdegga ah ee soo korodhey. Haseyeeshee, markii iskahorimaadyada iyo nabadgelyo-xumadu ay sii socotey si aan isa soo dhimmeynin, ayaa la xaqiiqsay in loo baahan yahay in la sameeyo istiraatiijiyad wax looga qabto baahida biyaha ee muddada fog ee dadka gudaha ku barokacay iyo bulshooyinka martigeliyey.

Sidaa daraaddeed laga soo bilaabo bishii Agoosto 2008, UNICEF, oo la tashaneysay la-hawlgalayaasheeda ayaa sameysay oo bilowday in ay fuliso istiraatiijiyad loogu kala guurayo biyo-dhaamin buuxda ilaa tubooyin biyo socda leh. Sidaa daraaddeed, laga soo bilaabo bishii Sebtembar 2008, biyo dhaaminta, waxa ay UNICEF ka barbarwaddey taageero ay siineysey la-hawlgalayaasha in ay dayactiraan ilaha biyaha ee jira ama sameeyaan kuwo cusub ay dayactiraan ayna dhisaan nidaam tubooyin biyaha wada, ujeeddaduna waxa ay ahayd in marka dambe biyo-dhaaminta lagu beddelo tubooyin biyo wada.

Waqtigan la joogo la–hawlgalyaasha UNICEF waxa ay qodeen hal ceel waxaana ay dayactireen saddex kale, waxa ay dhig 8en.5 km oo nidaam tuubooyin biyo wada ah waxa ay dhiseen shan bekadood si ay uga faa'iideystaan 150,000 oo Dad Gudaha Ku Barokacay oo waddada Afgooye iyo Degmada Dayniile ee ku dhow deggan. Arrintaan ayaa ka dhigan is dhin ilaa 60% ah oo ku timid biyo-dhaamintii. UNICEF iyo la-hawlgalayaasheedu waxa ay wadaan shaqo ay ku wanaajinayaan nidaamka tuubooyinka biyaha wada ee xerooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay, haddii laga fursado masiibooyin aan hadda la sii saadaalin, waxa ay rajeyneysaa in ay si buuxda u joojiso biyo-dhaaminta waddada Afgooye iyo Waqooyiga Muqdisho marka la gaaro dhammaadka Juunyo 2009. UNICEF iyo la-hawlgalayaasheedu waxa ay dhiseen in ka badan 5,000 oo musqulood, waxaana ay maaddada koloriinta ku dareen ceelal, waxaana ay qabteen ololayaal nadaafadeed oo ujeeddada looga dan leeyahay aaney ahayn oo keliya helidda biyo ammaan ah oo la cabbo ee ay sidoo kale ku jirto ka qaybqaasdahada waarinta caafimaadka iyo wanaagga Dadka Gudaha Ku Barokacay. Iyada oo ay jiraan culayso badan, laguna jiro waqtiyo nabadgelyo xumadu ay badan tahay oo ay yar yihiin fursadaha lagu fulin karo oo lagu kormeeri karo waxqabadyada socda, haddana UNICEF iyo la-hawlgalayaasheedu waxa ay si adag u ilaaliyeen ballanqaadkii adkaa ee ay ku bixinayeen biyo la cabbo oo aan kala go'in iyo adeegyo fayadhowr oo ay siinayeen dadka ku soo barokacay iskahorimaadyadii Muqdisho. Ballanqaadkaas adag ee la-hawlgalayaasha biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda iyo kan deeq-bixiyeyaasha ayaa UNICEF u oggolaadey in ay ka soo baxdo ballanqaadkii ay u qaaddey carruurta ku jirta xaaladda degdegga ah – oo ahaa in ay hubiso in la helo biyo ammaan ah iyada oo la tixgelinayo asturnaanta, sharafta iyo ammaanka haweenka iyo gabdhaha.

**Adeegga biyaha oo wax tarey bulsho dhan** *Ka yimid bogga 2*

Iyada oo aad u faraxsan, oo afarteeda carruur ee yaryarina ay dhinacyada kaga jiraan, ayaa Safiya waxa ay tiri annaga oo hadda haysanna biyo ammaan ah oo nagu filan oo aan goyn karno iyo Xarun MCH iyo dugsi bulshada u adeega, "waa riyo noo rumowday".

Waxa ay intaa raacisey:

*"Markii aan booqdo xarunta MCH-ka magaalada si ilmaha aan u soo tallaalo iyo si aan isu soo baaro marka aan uurka leeyahay, waxa aan maqli jirey in UNICEF tallaal iyo daawooyin kale ay lacag la'aan ku siiso carruurta iyo haweenka, Hadda waxa aan ogahay in UNICEF ay ka shaqeysey wanaagga dhammaan xubnaha bulshada".*

**UNICEF iyo NGO-yada oo 250,000 IDPs-ka Afgooye iyo Muqdisho Siinaya biyo ...**

# Maamulka adeegyada biyaha oo ballaarintooda loo Marey iskaashiga maamullada-ganacsiga

Barnaamijka UNICEF ee Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda magaalooyinka ee Soomaaliya ayaa ku yimid dadaal sanado socdey oo lagu sameysaney barnaamij ay ka qayb qaadanayaan deeq-bixiyeyaasha muhiimka ah ee dalka.

Magaaleynta ayaa ah jid uu dalku ku socdo, UNICEF oo diiradda saareysa wanaagga carruurta iyo haweenka, ayaa aad muhiim ugu tahay taageero la siiyo adeegyada biyaha ee Soomaaliya. Halkaan, qoysaska ayaa aad isugu dhowdhow marka la barbar dhigo degaannada miyiga, biyo-yaraanta ayaana keeneysa dhibaatooyin caafimaad oo fara badan gaar ahaan ay ku keentaa carruurta yaryar.

Ka dib dagaalladii sokeeye ee dabadheeraa ee ka dhacay Soomaaliya, nidaamyada biyaha ee magaalooyinka ayaa kala go'ay taana waxaa ay keentey in dadka magaalooyinka deggan ay awoodi waayaan in ay biyo nadiif ah ay joogto ugu helaan qiime caadi ah.



*Wefdiga Guddiga biyaha ee Baydhabo oo warbixin ka dhegeysanaya Guddiga biyaha ee Boorama. Credit© UNICEF Somalia/2009*

Si loo suurtageliyo nidaam biyo helid oo la isku halleyn karo, UNICEF waxa ay marka laga soo tago taageeridda dayactirka kaabayaasha biyaha ee hallaabey, ay u qalab qaaddey sameynta iyo wanaajinta maareyn hagaagsan iyada oo loo marayo iskaashi dhex mara maamullada iyo ganacsiga.

Habkaan ayaa keenaya in si kordheysa ay ugu lug yeeshaan ganacsiga bixinta adeegyada biyaha, ee caadi ahaan ay bixin jireen loona arki jirey in ay tahay shaqada dowladda/maamulka.

Habkaan iskaashiga ganacsiga iyo maamullada waxa uu xoojinayaa doorarka kala duwan ee isdhammeystiraya waxaana uu xoojinayaa maamullada (khaladdaadka maamullada) iyo ganacsiga (maareyn, hawlgal iyo dayactir hagaagsan iyo maalgelinta ballaarinta kaabayaasha) iyada oo UNICEF ay noqoneyso lataliyaha iyo fududeeyaha geeddi-socodka.

UNICEF waxa ay si guul leh habkaan dolwadda iyo ganacsiga ay iska kaashanayaan nidaamyada biyaha magaalooyinka uga bilowday Soomaaliya sanadkii 1997, ilaa maantana, taageerada UNICEF, waxa ay keentey in 10 mashruuc oo dowladda iyo ganacsiga iska kaashanayaan ay marayaan weji kala duwan ayna ka shaqeynayaan Soomaaliya.

Tusaale laga soo qaadan karo waxqabyada ayaa ah mashruuc ay maalgelisey USAID oo looga dan lahaa dayactirka iyo ballaarinta nidaamka biyaha ee magaalada Baydhabo iyo u sameynta maamul maareeya oo ku dhisan mabaa'diida iskaashiga maamulka iyo ganacsiga.

Si arrintan loo fududeeyo, waxa 2dii ilaa 11kii Febraayo 2009, ay UNICEF u qabanqaabisey Guddiga Biyaha ee Baydhabo safar ay ku booqanayaan Sharikadaha Biyaha ee Shaba iyo GUMCO oo si guul leh u kala maamulaya nidaamyada biyaha ee Boorama iyo Boosaaso ee Waqooyi-galbeed ee Soomaaliya ('Somaliland') iyo Waqooyiga Bari ee Soomaaliya ('Puntland'). Labadan mashruuc ee dambe waxaa lagu dhisey taageerada UNICEF ay ka heshey USAID, Dowladda Netherlands iyo Midowga Yurub.

Ujeeddada booqashadani waxa ay ahayd in la fududeeyo wax kala barashada iyo waayo-aragnimo kala qaadashada, inta uu socdo geeddi-socodka sameynta mashaariicda iskaashiga maamullada iyo ganacsiga ee magaalooyinka.

Waxa ay ahayd fursad aad muhiim ugu ah xubnaha Guddiga Biyaha Baydhabo ee dhowaan la dhisey in ay la kulmaan kooxaha maareynta ee Shaba iyo GUMCO ayna si toos ah uga bartaan culaysyada iyo guulaha ay la kulmeen muddadii dhowr iyo tobanka sano ah ee ay maareynayeen nidaamyada biyaha ee magaalooyinka gobolladooda.

Muddadii ay booqashadan socotey, kooxdii Baydhabo ka socotey waxa ay heleen fursad ay si wanaagsan ugu fahmi karaan habka iskaashiga dowladda iyo ganacsiga oo ka dhigan qaab waari kara oo adeeg wanaagsan siiya macaamiisha oo maaliyadna ay ka helaan maareeyeyaasha (Guddiga/ Sharikadaha Biyaha).

Wefdigu waxa ay sidoo kale kororsadeen aqoon la xiriirta noocyada heshiisyada, iyo sida ay heshiiskooda ugu sameysanayaan magaalada Baydhabo marka aaney dowlad jirin.

Xubnaha waxa ay barteen in haddii ay rabaan in uu mashruucu guuleysto, ay tahay in ay kala saaraan waajibaayada guddiga iyo kan maareynta iyo in shaqo-qorista shaqaalaha ay ku dhisnaato kartida iyo aqoonta qofka. Waxaa sidoo kale ay si wanaagsan u fahmeed heshiisyada macaamiilka/adeeg bixiyaha iyo geeddi-socodka biyo-gelinta guryaha.

Xubnaha guddigu waxaa ay la yaabeen hufnaanta iyo adeegga wanaagsan ee sharikadahu ay biyaha u siinayaan macaamiisha Boorama iyo Boosaaso, gaar ahaan marka la barbar dhigo Biyo bixinta gaarka loo leeyahay ee Baydhabo taas oo si liidata loo maareeyo.

Xubnaha waxa ay si gaar ah u jeclaayeen in ay arkaan in sharikadaha ay awood u leeyihiin in ay soo iibsadaan alaabo iyo qalab (uu ku jiro riigga ceelasha lagu qodo) ayna bakhaarada ku haystaan si ay ugu dayactiraan ayna ugu ballaariyaan nidaamyadooda iyaga aan ku xirnaan gargaarka deeq-bixiye.

Wefdiga reer Baydhabo aad ayaa ay u xiiseynayeen booqashada waxaana ay u ekaayeen kuwo u diyaar ah in ay wax ka bartaan ayna qaataan wixii ay arkeen si ay uga fuliyaan biyo bixintooda. Gebagebadii booqashada, mid ka mid ah ka qaybglayaasha ayaa yiri;

"Waxa aan u haystey in Barnaamijka Iskaashiga Maamullada iyo Ganacsiga uu yahay geeddi-socod ay UNICEF biyo ku siineyso shakhsiyaad kuwaas oo goonidooda u maareeya qiimaha ay rabbaana u gooya, laakiin hadda waxa aan u arkaa si sidaas ka duwan waxaana aan bartey sida wanaagsan ee loo maareeyo nidaam biyo-bixin oo waara."

**10 mashruuriicda maamullada iyo dowladda ah oo heerar kala duwan maraya...**

## Guulaha ugu muhiimsan ee barnaamijka UNICEF ee WASH uu gaarey sanadka 2008

Sanadkii 2008da xaaladda bani'aadamnimada Soomaaliya ee sii xumaaneysay waxa ay xaaladda adeegyada Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda ay gaarsiisey heerar aad u hooseeya. Arrantan waxaa ay dhaliyey iska horimaadyo hoose, barokac baahsan, jiilaal dheeraaday oo ay xigeen roobab yar, ayna uga sii dareen dhibaatooyinka dhaqaale (sicirbarar sarreeya, dhibaatooyin ka dhashey cuntada iyo shidaalka oo qaali noqdey), oo ka hor istaagey bulshadaa horeba saboolnimada u dillootey in ay abaabulaan hababkii ay caadi ahaan kaga bixi jireen dhibaatada.

Barnaamijyada UNICEF waxaa ay sidaa daraaddeed ay diiradda saareen la shaqeynta la-hawlgalayaal si wax looga qabto dhibaatooyinka ka sii darayey, iyada oo dad lagu qiyaasey 805,000 oo dalka oo dhan ku nool lala gaarey waxqabadyo bani'aadamnimo oo lagu bixinayey biyo ammaan ah, adeegyo fayadhowr iyo dhiirigelinta nadaafadda oo lagu bixinayey degaan u nugul daacuunka.

Dadaalladan *u diyaargarowga iyo wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah* waxa ay diiradda saareen hubinta in la bixiyo biyo ammaan ah iyada oo la dayactirayo, la dhisayo lana qalabeynayo ilo biyood istiraatiiji ah (ceel matoorro, nidaamka biyo-siinta miyiga iyo ceel gacmeedyo) iyo sidoo kale waxqabad ballaaran oo ka dhexeeya hay'adaha oo biyo lagu dhaaminayo si loo qaabilo baahida ba'an ee ay qabeen dadka gudaha ku barokacay ee ku noolaa Afgooye iyo Waqooyiga Muqdisho.

Bixinta adeegyada fayadhowrka ayaa sidoo kale la hubiyey iyada oo la dhisey musqulo iyo iyada oo qalab fayadhowr la siiyey xerooyinka dadka gudaha ku barokacay, dugsiyada kumeel-gaarka ah iyo adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka. Ka hortagga iyo xakameynta shubanbiyoodka ba'an/daacuunka ayaa lagu gaarey koloriin ku daridda ceelasha, qaybinta biyo nadiifiyeyaasha iyo biyodhaamin degdeg ah (iyada oo qaar ka mid ah alaabtaasi ay hore ay u sii hayeen la-hawlgalayaasha gobollada si loo fududeeyo waxqabad wanaagsan) iyo dhiirigelinta nadaafadda.

Guul weyn oo la gaarey sanadka waa markii la baajiyey arrin noqon lahayd masiibo bani'aadamnimo oo la xiriirta helidda biyo ammaan ah iyo halis loo galo cudurro dillaaca.

In kasta oo degaanka laga shaqeynayey ay nabadgelyo-xumo ka jirtey uuna xumaa, haddana horumar wanaagsan ayaa Soomaaliya oo dhan laga gaarey yoolalka *muddada dheer* ee xoojinta maamulka iyo siyaasad dejinta iyo in la badiyo helidda adeegyo biyo joogto ah, fayadhowr iyo nadaafad oo lagu bixiyo goobaha aaney ka jirin xaaladaha degdegga ah – oo u badan Somaliland iyo Puntland.



***Ceel dhismihiisu socod ee uu Midowga Yurub ku maalgeliyey gobolka Shabeellaha Dhexe. Credit© UNICEF Somalia/2009***

Si loo dhiirigeliyo wanaajinta *Maamulka Biyaha iyo Fayadhowrka,* UNICEF waxa ay maamullada qaranka iyo bulshooyinka degaanka ka taageertey in ay ka soo baxaan waajibaadka ka saaran bixinta adeegyada biyaha.

Arrintaa waxaa ka mid ah aa tageero la siiyey maamullada si ay u sameeyaan iyo/ama ay kor ugu qaadaan hab-raaca/siyaasadda biyaha ee gobollada kala duwan, u kobciyaan kaabayaashooda iyo awooddooda farsamo (dayactirka xafiisyada iyo diyaarinta qalabka lagu baaro/dhadhemiyo biyaha) iyo hoggaaminta munaasabadaha ay ka mid tahay Maalinta Biyaha Adduunka – oo ka mid ah fursadaha ugu muhiimsan ee loogu qareemeyn karo arrinta.

Heer bulsho, guddiyada maareynta biyaha ayaa lagu tababarey maareynta, kharash soo celinta, ka shaqeysiinta iyo dayactirka nidaamyada biyaha ee miyiga halka sameynta iskaashiyada dowladda iyo ganacsiga ee dhinaca maareynta biyaha magaalooyinka la sii horumarinayey.

Intaa waxaa dheer, in UNICEF ay sii waddo hawlaha ay ku dayactireyso, ku dhiseyso ayna ku qalabeyneyso ilahii biyaha ee hore u jirey iyo kuwo cusub, oo ay ka mid yihiin ceelasha iyo nidaamyada biyo-gelinta – si kor loogu qaado biyaha la cabbo ee ay u helaan bulshooyinka ku nool miyiga iyo magaalooyinka, oo ay ka mid yihiin dadka gudaha ku barokacay ee qaba baahida daran.

Fayadhowrka dugsiyada ayaa taageerey iyada oo la wanaajiyey musqulahooda – lana kala saarey musqulaha wiilasha iyo gabdhaha – iyo goobo faraha lagu dhaqso oo la sameeyey iyo qalabka fayadhowrka oo la siiyey dugsiyada aasaasiga ah ee ku yaalla Soomaaliya oo dhan. Waxaa sidoo kale la wanaajiyey adeegyada fayadhowrka ee xarumaha caafimaadka hooyada iyo dhallaanka.

Waxqabadyada *Lagu Beddelayo Habdhaqanka* ayaa waxa ay diiradda saareen wanaajinta habdhaqanka nadaafadda iyo fayadhowrka ee carruurta dugsiyada iyo bulshooyinka miyiga iyo magaaladaba iyada oo loo marey Tababarka Carruurta ee Nadaafadda iyo Fayadhowrka Carruurta iyo tababarka Ka qaybgalka ee wax ka beddelka Nadaafadda iyo Fayadhowrka. Maalinta Gacmodhaqashada Adduunka ayaa markii ugu horeysay looga dabaal degey 90 dugsi waxaana ka qaybqaatey in ka badan 20,000 oo carruur ah. Waxqabadyada ayaa xoogga saarey muhiimadda ay leedahay in saabuun lagu gacmo-dhaqdo.

***Wixii xog dheeri ah oo ku saabsan barnaamijkeena ama sida aad noo taageeri karto, fadlan nagala soo xiriir:***


| | | |
|---|---|---|
| **Christian Balslev-Olesen, Representative** | **cbalslev@unicef.org** | **+ 254 722 514 569** |
| **Iman Morooka, Communication Officer,** | **imorooka@unicef.org** | **+ 254 714 606 733** |
| **Zaid Jurji , Chief, Water, Sanitation and Hygiene** | **zjurji@unicef.org** | **+254 723 786 975** |
| **Annmarie Swai, WASH Project Officer** | **aswai@unicef.org** | |
| **Robert Kihara, Communication Officer** | **rkihara@unicef.org** | **+ 254 722 206 883** |


***Nagu soo booqo www.unicef.org/somalia***